
JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## *FASALKA AFRAAD*



JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashadda & Barbaarinta

# KACAANKA

## *FASALKA AFRAAD*

## 4



Madaxweynaha G.S.K.
Jaalle S. G. Maxamad Siyaad Barre

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo
aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
laga helin oggolaansho

Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar — 1976

Mahadnaq

Waxaan u mahadnaqaynaa qorayaashii kitaabkan oo ah :

Maxamad Xaaji Abanuur

Faaduma Cali Daahir

Isku dubaridayaashii oo ah :-

Ibraahim Maxamuud Abyan

Maxamad Cali Warsame

Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suura geliyey soo saaridda kitaabkan oo uu ka mid yahay Ciise Maxamed Ciise oo sawirrada u sameeyey iyo garaacyaashii garaacay.

Xafiiska Manaahijta

# TUSMO

**MAGACA CASHARKA** **BOGGA**


Kacaankii 21 Oktoobar . . . . . . . . . . . . 1

Kacaamaddii Soomaaliya . . . . . . . . . . . 8

Dhismaha Dawladda . . . . . . . . . . . . . 11

Xuquuqda iyo waajibaadka qofka Soomaaliyeed . . 20

Iskaa Wax U Qabso . . . . . . . . . . . . 22

Nafti-Hure (Sheeko) . . . . . . . . . . . . . 25

*C*umar Binu Khadaab . . . . . . . . . . . . 29

Jaamicadda Dawladaha Carabta . . . . . . . . 32

Soomaaliya waa xubin ka mid ah Ururka Jaamacadda
Dawladaha Carabta . . . . . . . . . . 37

Ciidaha Soomaaliya . . . . . . . . . . . . . 40

*C*adawga Ummadda Soomaaliyeed . . . . . . . 46

# GOGOLDHIG

Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha way ku cusub tahay Manhajka Waxbarashada ee dalkeenna Soomaaliya. Sidaas daraadeed, waxa la oran karaa macallinku waayo-arag nimo la sheego kuma laha Maaddadan.

Hase yeeshee, macallinka ku nool, kuna noolaa waagan cusub ee kacaanka ah, wuxuu leeyahay, run ahaan, dhaqan kacaanimo oo uu ku sheegan karo (ku dacwiyi karo) in aynan Maaddadu ku cusbayn, maxaa yeelay waxay ku saabsan tahay oo ay ka hadlaysaa wixii uu ku dhex noolaa iyo shaqada uu maalin kasta qabanayo, ilaa iyo intii Kacaanku waddanka maamulayey.

Buuggan oo ah (buugga afraad) ee Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waxaa loogu tala galay «Fasalka Afraad» ee Dugsiyada Hoose - Dhexe, ujeddada laga leeyahay buugganna waxaa weeye :-

1. In ardayga inta uu yar yahay lagu beero waddaninimo, geesinimo, nafti-hurenimo, isku kalsooni iyo shaqo jeceyl.

2. In lagu beero ardayga kacaanimo, horusocodnimo iyo hantiwadaagnimo.

3. In lagu kaalmeeyo ardayga inuu fahmo nolosha ku meersan degaankiisa siyaasiga ah, dhaqaalaha iyo nolosha ijtimaaciga ah.

4. In lagu gargaaro ardayga inuu garto xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa si uu u noqdo mawaadin suuban.

5. In loo tilmaamo ardayga cadawgiisa iyo saaxiibbada dalkiisa Soomaaliya.

Waxaas oo dhan ujeeddada laga leeyahay waxaa weeye in loo horseedo in la dhiso beel Soomaaliyeed oo cusub, caafimaad qabta oo hantiwadaag ah. Waa waajib had iyo jeer, marka casharradan la dhigayo in la tixgeliyo heerka koritaanka caqliga iyo cumriga ardayga oo loo sahlo fikradaha ku jira casharrada.

Macallimiintii Buuggan ka soo shaqaysay, ayagoo maskaxda ku haya arrintaas aan soo sheegnay, waxay aad ugu dadaaleen in Buuggan iyo fikradaha ku jira casharrada ku qoran ay noqdaan kuwo fudfudud, sahlan oo ku dhisan degaanka iyo sabada beesha siyaasadda iyo dhaqaalaha ee ardaygu ku dhex nool yahay. Sidaas daraadeed, waxaan filaynaa in ardaygu fahmi karo oo qaadan karo waxa ku qoran Buuggan.

Ardaygu wuxuu horey u soo dhigtay saddex buug oo ah Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beèsha, wuxuuna ku soo qaatay fikrado kala duwan oo ku tallaalaya jecaylka waddankiisa, ummaddiisa iyo kacaankiisa hantiwadaagga ah, kuna fahmo waxa Buuggan ku qoran.

Waxaa aad u wanaagsan in macallinku ardayda wax ka weydiiyo una soo koobo duruustii sanooyinkii hore. Waxaan filaynaa in ardayda buuggan baranaysa da'doodu yar tahay 10 - 12 jir, inta badan Macallinku waa inuu tixgeliyaa ardayda cumrigoodu sidaas u yar yahay, waana inuu ku fikiraa siduu u bislayn lahaa una korin lahaa caqligooda iyo caadifadooda, oo uu u dhisi lahaa shucuurkooda waddaniga ah. Casharrada mooyee, wuxuu macallinku ku korin karaa caqliga ardayda iyo aqoontooda guud, isagoo jeclaysiiya wax isweydiinta, doodda, akhriska iyo siduu dugsiga dibaddiisa wax ugu baran lahaa. Baraha waxaa ku waajib ah, asagoo gudanaya xilkiisa oo ka faa'iideysanaya meeheraddiisa Macallinnimo inuu si aad ah ugu faahfaahiyo ardayda casharrada, buugga oo dhanna uu u dhigo, waxaa kaloo baraha ku waajib ah inuusan isku soo koobin Buugga keliya, ee macluumaad dheeraad ah siiyo ardayda.

Macluumaadkaasi waa inuu waafaqsanaado Buugga fikir ahaan iyo heer ahaan. Waxaa lagama maarmaan ah in

ardaydu cuqdo ka qaaddo casharrada qaarkood, ama maaddada oo dhan, iyo macallinkaba· Taasi way dhacdaa, maadooyinkoo dhan way ku dhacdaa, baruhu waa inuu iska ilaaliyaa aafadaas.

Laakiin culimada tarbbiyadda waxay la tahay in macallinku yahay waxa muhimka, asaasiga ah oo ardayda jicleysiin kara maaddada iyo cilmiga guud ahaanba. Macallinka fiican maaddadiisa waa la jecel yahay. Waxaa kaloo muhim ah in la xuso in cashar kasta ay ku jirto fikrad ama fikrado asaas ah, macallinkuna waa inuu ku dadaalo inuu fikradahaas kala soo dhex baxo cashar kasta, ardaydana baro fikradda iyo ujeeddadeeda, waana in ardaydu fahmaan, barahuna waa inuu hubiyaa inay qaateen oo aammineen.

Ujeeddada buuggu waa in ardayda wax la aamminsiiyaa: Ummaddooda iyo Mabaadi'deeda iyo Dhaqankeeda. Ardayga da'daas ku jira waxaa lagu tiriyaa inuu xasaas (sensetive) yahay, wax kastana inta badan waa qaataa·

Sidaas daraadeed, waxaa waajib ah in ardayda si khayr qabta loo barbaariyo, ayadoo la kaalmaysanayo Buuggan. Casharrada Buugga ku qoran waa wada muhim, waana wada muqarar, hase yeeshee, casharrada Kacaanka iyo Dhismaha Dawladda baa aad muhim u ah, casharrada dhismaha Dawladda waa in ardaydu si fiican u bartaan, maxaa yeelay casharradaasi mar dambe ardayda ma soo marayaan. Cashar kasta marka la bixinayo, waa waajib in lagu dhaqmo ama la raaco jidka soo socda :

1. Marka casharka la bilaabo ilaa marka uu dhammaado waa in ardaygu si nool uga qayb galaa casharka, Macallinkana waxaa waajib ku ah inuu ardaydiisa ka qayb geliyo casharka uu bixinayo.

   Waxa aad doonaysid inaad ardayda u sheegtid, ama bartid marka hore weydii, ka doon jawaabta inay helaan, dabadeedna si tifaftiran ugu sharax.

2. Isku day, inta aad kartid, in casharku noqdo mid xiisa leh oo ardaydu jecelaato. Haddii ay ardaydu cuqdo qaado, waa ka xiisa dhacayaan casharka iyo

xataa adiga baraha ahba. Waligaa kici xiisaha ardayda, shuqli ardayda, oo maskaxdooda ka shaqaysii.

3. Waxaad ardayda xiisahooda ku kicin kartaa casharkaagana uga dhigi kartaa mid la fahmo oo la yaqaan marka aad isticmaashid qalabka dadka wax lagu baro (Visuala Aids). Ururso marka hore, qalabka ku kaalmeeynaya, qalabka kaalmadu marka aad cashar kasta bixinaysid waa muhiim.

4. Cashar kasta fikrad, ama fikrado asaasi ah ayaa ku jira, ujeedooyin baana laga leeyahay fikradahaas, bar ardayda fikradda iyo ujeeddada laga leeyahay, hubso oo sug inay fahmeen oo qaateen.

5. Cashar kasta marka uu dhammaado waa in ardayda la siiyaa layliyaal ay kaga shaqeeyaan dugsiga dhexdiisa iyo dibaddiisaba.

6. Casharradu waa inay isku xiriirsan yihiin oo isku dhisan yihiin.

Isugu xiji casharrada sida ay isu leeyihiin oo isugu dhaw yihiin, isuna raaci karaan.

Waxaa jira layliyaal aan ku qornay gololo (Mawduuc, kasta dhammaadkiisa, layliyaalkaas waa tilmaan. Isticmaal iyaga iyo kuwa aad ka soo dhex saartid cashar kasta.

Waxaana ka cudurdaaranaynaa, haddii ay jiraan wax gafaf ah ama nuqsaan ah oo aad ku aragtiin buuggan guud ahaan sababta oo ah Shaqada qoraalka Buuggu waxay ahayd degdeg, waana markii ugu horreysey oo la qoro buug noocan ah (Buuggu Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha), waxaana waajib ah inaad wixii gaf ah ama qalad ah oo aad aragtaan, Jaallayaal, la socod siisaan Xafiiska Manaahijta, ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta. Waxaan ku han weynnahay in Buuggani noqdo mid dantii laga lahaa keena, ardayda Soomaaliyeedna faa'iido uu yeesha.

*EEBBE HA INA WAAFIJIYO*

*— QORAYAALKA —*

## Casharka Kowaad

## KACAANKII 21kii OKT. 1969kii

Kacaankii barakaysnaa ee Soomaaliya u dhashay 21kii Oktoobar 1969kii, wuxuu ballan qaaday inuu dalka gaarsiiyo heer sare oo barwaaqo iyo baraare leh.

Kacaanku isagoo wakiil ka ah Ummadda Soomaaliyeed oo dhan wuxuu ku dhaqaaqay tallaabooyin cad-cad, si uu guul u gaaro, una daryeelo danta guud ee dadweynaha Soomaaliyeed.

Kacaanku tallaabooyinkaas uu ku dhaqaaqay wuxuu doonayaa inuu ku tirtiro waxyaalihii foosha xumaa ee la soo maray kacaanka ka hor.

Tallaabooyinkaasi waxay ku tifaftiran yihiin warqaddii 1aad iyo warqaddii 2aad ee la soo saaray markii kacaanku dhashay kaddib.

Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee kacaanka waxaa ka muuqda ujeedooyinka ballaaran ee kacaanku doonayo inuu dalka iyo dadkaba gaarsiiyo.

Warqadda 1aad waxay ka kooban tahay 13 qodob oo todoba ka mid ahi ay ku saabsan tahay siyaasadda gudaha, lixda kalena ay ku saabsan tahay siyaasadda dibedda.


Kacaanku wuxuu ku dadaalayaa inuu si habsami ah u maamulo qodobbadaas ku soo baxay warqaddaas.

Kacaanku wuxuu tixgelinayaa xuquuqda dadka xagga nabageliyada, sinnaanta, garsoorka, dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iwm.

### Warqadda 1aad ee Kacaanka

### B. Siyaasadda Gudaha

1. In la dhiso ummad u siman shaqada oo aan la kala soocin, iyadoo la tixgelinayo wax kasta oo saamey-



naya nolosha dadka Soomaaliyeed.

2. In lagu hanuunsho dadka horumarinta dhaqaalaha, nolosha guud iyo hiddaha Soomaaliyeed, si waddanku horey ugu maro.

3. In la ciribtiro aqoondarrada, dadkana loo iftiinsho qiimaha dhaxalgalka ah ee hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

4. In la sameeyo sida ugu habboon saldhiggii qorriinka iyo horumarinta Afka Soomaaliyeed.

5. In la dhammeeyo musuqmaasuqa oo idil, qaraabakiilka, qabyaaladda iyo wixii kale ee kharribaad ah oo dhan.

6. In la baaba'sho Axsaabta siyaasadda oo dhan.

7. In la sameeyo waqtigii ay habboonaato doorasho madaxbannaan.

### T. Siyaasadda Dibedda

1. In la taageero ururrada gobannimadoonka ah iyo iskaashiga adduunka.

2. In la horjoogsado, lalana dagaallamo gumeysiga iyo gumeysiga cusub.

3. In lagu dadaalo sidii dadka iyo dalalka Soomaaliyeed la isugu keeni lahaa oo loo mideyn lahaa.

4. In la aqoonsado mabaadi'da nabadgeliyada iyo wada noolaanshaha dadyowga adduunka.

5. In lagu socdo siyaasadda cad ee dhexdhexaadka ah.

6. In la aqoonsado mabaadi'da Ummadaha Midoobay iyo Ururka Midawga Afrika.

Qodobadaas intooda badan waa la hirgeliyey muddadii kacaanku dalka hoggaaminayey. Qabiilkii waa la xaaraameeyey, qofkii ku dhaqmana amaba ku dhaqaaqa ama qabiilnimo wax ku qabsada dambi ayuu galay, waxaana lagu qaadayaa sharci lagu ciqaabayo. Shaqadu waxay ahayd mid eexasho iyo laaluush lagu helo ama lagu maamulo kacaanka ka hor

Kacaanka ka dib weji kale ayey yeelatay. Waxaa shaqada maamula wasaarad loo sameeyey, waxaana la raacaa sharciyo loo dejiyey. Golayaasha Hanuuninta Dadweynaha ayaana wax ka qaybiya.

Shaqada waxaa lagu kala helaa tartan la dhex mariyo dadka shaqadoonka ah, si lagu kala ogaado aqoonta dadkaasi leeyihiin.

Maxaa taqaan ayaa beddeshay arrintii ahayd yaad taqaan.

Tallaabooyinka waaweyn ee kacaanku qaaday waxaa ka mid ah qoriddii Afka Soomaaliyeed, oo aynan dawliddii hore waxba ka qaban.

Taasuna waxay kordhisay garashada dadweynaha ee ku saabsan dhinac walba oo nolosha ah. Waxaa kale oo la baaba'shay axsaabtii ku dhisnayd qabiilka iyo xumaanta, waxaa la sameeyey meelo lagu horumariyo hiddaha iyo dhaqanka, iyo Kooxda Waaberi, oo kor u soo qaadaysa ciyaaraha iyo suugaanta Soomaaliyeed.

## Warqadda 2aad ee Kacaanka

Waraaqdda 11aad ee kacaanka waxaa laga garan karaa heerka sare ee cusub oo kacaanku rabo inay Soomaaliya gaarto. Haddaan eegno qodobka ugu horreeya ee siyaasadda gudaha waxaa noo muuqanaya in la dhisayo beel lagu maamulayo shaqo loo siman yahay iyo caddaalad.

Wada shaqaynta, sinnaanta iyo caddaaladda intuba waxay gogoldhig u yihiin mabda'a kacaankeennu uu dalka Soomaaliya ka hirgeliyey 21kii Okt. 1969kii, kaas oo ah Hantiwadaagga Cilmiga ku Dhisan ee lagu caddeeyey waraaqdii 11aad ee Kacaanka.

*Isla markiibana waxaa lagu dhaqaaqay in Ummadda Soo*maaliyeed lagu wareejiyo meelaha furaha dhaqaalaha dalka oo idil.

Ololayaal kala geddisan ayaa lagu qaaday waxyaalihii foosha xumaa ee aan ka dhaxalnay gumeysigii cusbaa iyo musuqmaasuqii.

Hanuunis ballaaran ayaa loo jeediyey dadweynaha Soomaaliyeed si loo mideeyo maskaxda dadkeenna, loogana tirtiro fikradihii gumeysigu ku beeray. Tallaabooyinkaas iyo kuwo kaleba waxaa loo qaaday in la nooleeyo dhaqanka Ummadda Soomaaliyeed.

Mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag si loo hirgeliyo wuxuu isbeddel run ahi ka bilaabmay habkii dhaqaalaha dalkeenna, dhinaca waxbarashada iyo caafimaadka.


Waxaa kale oo la sameeyey qaab cusub oo la isugu keenay bulshada sida, Ururrada Shaqaalaha, Dumarka, Dhallinyarada iwm.

## Xubnihii Dhaqaalaha ee lala wareegay

Kacaanku wuxuu ku dadaalay inuu xoreeyo dhaqaalaha Soomaaliyeed, tallaaba cadna wuu ka qaaday arrintaas.

Dhaqaalaha dalkeenna waxaa maamuli jiray kacaanka ka hor dad shisheeya ah, shisheeyuhuna wuxuu raadiyaa mar walba dantiisa gaarka ah ee isaga waxtarka u leh. Shaqaaluhuna waa halbowlaha nolosha ummadda. Qofka shisheeyaha ah ee gacanta ku haya maamulka dhaqaalaha dalka wax dan ahi uguma jirto in uu dhaqaalaha dalkaasi uu horumar gaaro. Dadka shisheeyaha ahi waxay ku dadaaleen inay cariiri geliyaan horumarka dhaqaalaheenna.

Sidaas darteed ayey lagama maarmaan noqotay in dhaqaalaha lagu wareejiyo gacanta dadka Soomaaliyeed, oo loo dhiibo dawladda. Dawladdu markii ay la wareegtay xilkii dhaqaalahana waxay ku dhaqaaqay inay ku daryeesho danaha



Ummaddeenna. La wareegga maamulka dhaqaalaha, waxaa lagu magacaabaa toleynta dhaqaalaha. Xubnaha la toleeyey waxaa ka mid ahaa Bangiyada. Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda, Wakaaladda Batroolka iyo Warshadda Son-

korta ee SNAI. Meelahaas oo uu ajnabi maamuli jiray waxay xilkeedii dawladdu la wareegtay 7dii Maajo 1970kii.

Mashaariicda cusub ee la sameeyey taariikhdaas kadib. waxay ahaayeen kuwo toleysan oo dawladdu maamusho.

Haddaynu eegno dhinaca sancada iyo beeraha intoodii badnayd sidoo kale waxaa lagu wareejiyey gacanta dadweynaha Soomaaliyeed.

Waxaana loo sameeyey hab wanaagsan oo qorsheyn ah, si heer sare loo gaarsiiyo waxa ay soo saarayaan.

Dhinaca daawada waxay Dawladda Soomaaliyeed la wareegtay maamulkeedii. Waxaana loo dejiyey sicir go'an oo ay ku iibiyaan Iskaashatooyinka Farmashiyayaashu daawada. Taasna waxaa lagu daryeelayaa danta Ummadda. Ascaarta cuntada iyadana waa la xadidey, ganacsigoodiina waa la toleeyey. Waxaa kale oo la toleeyey ganacsiga alaabta dhismaha ee dibedda ka timaadda, waxaa kale oo la toleeyey ganacsiga alaabta wax lagu qoro sida xaashiyaha, qallimada iyo alaabta xafiisyada lagaga shaqeeyo oo idil. Toleynta dhaqaalahu wuxuu markaa abuuray wakaalado kala duwan oo maamusha ganacsiga gudaha iyo kan dibedda sida Wakaaladda Ganacsiga Ummadda. Waxyaalahaas oo dhan waxaa looga danleeyahay in sare loo qaado heerka dhaqaalaha Ummadda iyo in wixii ka soo baxa lagu daryeelo oo loogu faa'iideeyo dadka Soomaaliyeed.

**L a y l i :**

1. Wax ka sheeg ujeeddooyinka kacaanka
2. Ka sheekee habka lagu hireglinayo ulajeeddooyinkaas.
3. Yaa maamuli jiray dhaqaalaha dalkeenna kacaanka ka hor? Yaase hadda maamula?
4. Tilmaan meelaha dhaqaalaha laga toleeyey.
5. Waa maxay toleyntu?
6. Maxaa looga danleeyahay toleynta dhaqaalaha?
7. Soo baar, waxna ka soo qor Wakaaladaha xafiisyada ku leh degmadaada.

## Casharka Labaad

# KACAAMADII SOOMAALIYA

Soomaaliya waxay soo martay halgan dheer, halgankaas oo isdabajoog ahaa tan iyo waagii uu gumeysigu soo faragelliyey Soomaaliya. Kacaankii 21kii Oktoobar wuxuu ka mid ahaa kacaanna badan oo Ummaddeennu u soo martay xornimadeeda. Kacaannadii ay Soomaaliya soo martay waxay ahaayeen kuwo horusocod ah oo doonaya inay nolosha dadkeenna horumar gaarsiiyaan.

In kasta oo gumeysigu is hortaagay, siyaala badanna uu u cadaadiyey dadkii horseedka u ahaa kacaannadaas iyo dadweynaha intiisa kaleba, haddana Ummadda Soomaaliyeed waxay ku joogtaaa waddadii cadayd ee ay horumarka ku gaari lahayd.

Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii haddaan eegno, wuxuu curtay waqti ay dadka Soomaaliyeed u baahnaayeen in isbeddel uu ka dhaco meel walba oo nolosheenna ah. Sababtoo ah sagaalkii sano ee kacaanka ka horreysey ayaa waxyaalo baddan oo foolxumi dhaceen.

Xornimadii muddada dheer loo soo dagaalamayey waxay halis u noqotay inay lunto. Saddex cudur oo xunna way ku faafeen dalkeenna, gaajo, cudur iyo aqoondarro, waxaana keenay in saddexdaas waxyaalood faafaan maamul xumadii dawladdii jirtey waqtigaas, taas oo maamulkii dhaqaalaha, wax barashada iyo caafimaadkiiba dad shisheeya ah gacanta u galisay. Dadkii waxaa la isaga horkeenay reer reer. Dadkii walaalaha ahaa waxaa loo qaybiyey axsaab iyo ururro qabiil ku dhisan.

Shisheeyahaas waxay dantiisu ku jirtey Soomaaliya inay dib u dhacdo oo heer hoose ay joogto. Kacaanku wuxuu ku dadaalay, tallaabooyin dhaadheerna ka qaaday sidii xornimada ummaddu ay u nabadgeli lahayd. Wuxuuna dagaal ku qaaday gaajadii, cudurkii iyo aqoondarradii dadkeenna haysatay.

Taariikhda Soomaaliya haddaan dib u raacno, waxaan arkaynaa inay soo martay kacaanno isdabajoog ah oo ujeeddooyinkoodu ay isku mid ahaayeen. Axmad Ibraahim Gurey (1525 - 1543) dagaalkii uu Xabashida ku qaaday wuxuu uga dan lahaa, in uu dalka Soomaaliya ka celiyo Xabashida oo Bortoqiisku kaalmeenayey. Taasna wuu ku guuleystey, waxaana koonay isbahaysiga Xabashida iyo Reer Yurub iyagoo isku diin ah iyo iyagoo doonayey inay Soomaaliya wada gumeystaan.

Dalka Soomaaliyeed oo ay maanta haysato Xabashidu waxay ku heshay gacantii ay siiyeen Ingiriisku, Talyaanigu iyo Faransiisku. Geesiyaasha kale ee Soomaaliya u soo kacay waxaa ka mid ahaa Sayid Maxamad Cabdille Xasan oo muddo 20 sano ka badan la dagaallamayey afar gumeyste oo dalkeenna kala qaybsaday.

Gooba badanna wuu kaga guuleystey gumeystayaashaas oo dhan, ujeeddadiisuna waxay ahayd inuu xoreeyo dadka iyo dalka Soomaaliya iyo haddana inuu mideeyo. Geesigii Faarax Comar wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyey oo qoraalka kula dagaallamay gumeysiga Ingiriiska, si uu ummaddeenna ugu tilmaamo dulliga iyo cadaadiska gumeysigu ku hayo.

Wuxuu mar walba ka faallooon jirey sida dalkeenna loo kala qaybiyey iyo maamul xumada uu xukunka gumeysigu ku dhisan yahay. Sheekh Bashiir wuxuu ahaa geesi marar badan dagaal ku soo kiciyey Ingiriiska, isagoo ka gilgilanaya dhibaatooyinka uu ku hayo ummadda Soomaaliyeed. Geesiyaasha kale waxaa ka mid ahaa Sh. Xasan Barsane oo Talyaaniga kula dagaallamay Degmada Marka iyo Maxamuud Xarbi oo wax badan u dagaallamay xoreynta Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto.

Dhawaaqa siyaasadeed intaas kuma ekeyn ee wuu ka ballaarnaa. Xisbiyada u soo halgamay xoreynta iyo isu keenidda ummadda Soomaaliyeed waxaa horseed u ahaa dhaqdhaqaaqii dhalinta Soomaaliyeed (SYL).

Dhinaca woqooyi waxaa jirey Xisbiyo siyaasi ah oo ay ka mid ahaayeen SNL iyo USP. Iyaga oo isla jirey ayey da-

gaal dheer la galcen gumeysiga.

Xisbiyaasha aan soo sheegnay oo dhan waxay ujeeddadoodu ahayd xoreynta iyo mideynta dadka iyo dalka Soomaaliyeed.

Haddaba waxaynu ka garanaynaa markii aan eegno taariikhda Soomaaliya,, in kacaannadii aan soo marnay iyo halgankii dheeraaba ay isku ujeeddo iyo isku dan ahaayeen.

Mar walba waxaa loo dagaallamaayey sidii loo xoreyn lahaa, isla markaana loo mideyn lahaa ummadda Soomaaliyeed.

Dagaalkii lagu gaari lahaa dantaasna weli waa uu socdaa, waana soconayaa ilaa ay Soomaaliya gaarto midnimo iyo xornimo buuxda.

Xoreyntaas iyo midnimadaasuna waxaa weeye albaabkii loo mari lahaa barwaaqeynta ummaddeenna. Barwaaqeyntaas oo ah in laga baxo gaajada, cudurka iyo jahliga.

L a y l i :

1. Intee kacaan ayey Soomaaliya soo martay?
2. Sheeg ujddooyinka Kacaankii 21kii Oktoobar.
3. Maxaa dalkeenna ku faafay muddadii kacaanka ka horreysey?
4. Geesiyaasha aan casharka ku soo sheegnay maxay u dagaallamayeen?
5. Maxay ahaayeen ujeeddooyinka halgammadii aan soo sheegnay?
6. Maxay ahaayeen xisbiyadii u soo halgamay xoreynta dalkeenna?

## DHISMHA DAWLADDA

Soomaaliya waa Jamhuuriyad Dimoqraadi ah, waxay leedahay calan keliya, xeer keliya iyo Madaxweyne keliya.

Dhismaha dawladdu wuxuu u qaybsamaa saddex qaybood oo waaweyn, qayb kastaana waxay leedahay awood ay ku qabato hawlaheeda.

Hay'adaha ama qaybaha waaweyn ee ay dawladdu u qaybsan tahay waxaa weeye :

I. Hay'dda Xeerka.

II. Hay'adda Fulinta

III Hay'adda Garsoorka.

1. **HAY'ADDA XEERKA**
   Hay'adda xeerka samaysa waxay ku dhafantahay oo haya Golaha Sre ee Kacaanka, waana Hay'adda ugu sarreysa Dowladda J.D.S. Shaqada hay'addaas waxaa ka mid ah: dejinta xeerka iyo qawaaniinta la xiriira ee dalka lagu dhaqo sida:

1. Sharciyada Maxkamadaha lagaga shaqeeyo.

2. Jideynta canshuuraha iyo sida loo bixiyo.

3. Miisaaniyadda dawladda sannad kasta.

4. Beddelka qorsheynta dhaqaalaha iyo wax ka beddelka xeerarka.

5. Beddelaadda heshiisyada dawliga ah.

6. Ku dhawaaqa dagaalka.

7. Kormeerka iyo fatashaadda sida shaqada iyo sharciyadu u fulaan iwm.

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya waxaa guddoomiye u ah Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Maxamad Siyaad Barre.

### Shaqada Guddoomiyaha G. S. K.

1. Wuxuu guddoomiye u yahay G.S.K. iyo Golaha Xoghayayaasha.

2. Wuxuu u taagan yahay midaynta ummadda Soomaaliyeed.

3. Wuxuu isku xiraa shaqada labada gole.

4. Wuxuu magacaabaa Xoghayayaasha iyo Madaxda Sare sida Danjirayaasha, Agaasimayaasha Guud, Guddoomiyaha Gobollada — Degmooyinka iwm.

5. Wuxuu saxiixaa wax alla wixii sharci ah, Madaxweynuhu waa xushmadda ummadda.

6. Wuxuu awood u leeyahay inuu u dembi dhaafo ruuxii la ciqaabo.

7. Waxaa xil ka saaran yahay qaybaha kale ee dawladda: sida hay'dda fulinta iyo hay'dda garsoorka.

Xilka ugu weyn dalka waa xilka madaxweynanimada, Madaxweynanimadu waa mas'uuliyad aad u ballaaran oo qallafsan, waxaa ka bixi kara ruux (qof) dhif ah oo karti, aqoon waddaninimo, waayo-aragnimo dheeraad ah iyo geesinimo leh. Madaxweynaha waxaa waajib ku ah :

1. Inuu ilaaliyo oo fuliyo xeerarka dalka u dajisan.

2. Inuu ogaado guud ahaan, baahida dadka, baahida maanta iyo tan berri, kana shaqeeyo oo u horseedo sidii looga bixi lahaa baahidaas.

3. Inuu leeyahay aragti siyaasi ah, dhaqaale ah, bulshonimo oo horusocod ah.

4. Inuu yahay caadil geesi ah, maamul dawladnimana ku shaqeeya.

5. Inuu noqdo qof u qalma madaxweyne ummaddeed:- maamul ahaan, muuq ahaan, madax ahaan iyo mabda'a ahaan, macnuhu waxaa weeye in madaxweynuhu meel walba ka dhan yahay.

6. Inuu noqdo qof garan kara, oo dhisi kara, maamul dawladeed, oo horukac leh.

7. Inuu noqdo qof karti u leh inuu fahmo, hoggaamiyo howlaha dawladda oo dhan.

## II. HAY'ADDA FULINTA:

Hay'adda fulintu waxay ka dhisan tahay Golaha Xoghayayaasha, Golaha Xoghayayaashu waa hay'adda dalka u qaabbilsan fulinta shaqooyinka.

Shaqooyinka dawladdu way qaybsan yihiin waxayna u qaybsamaan Wasaarado iyo Wakaalado ........ Wakaaladaha intooda badani waxay hoos yimaadaan Wasaaradaha, inta kalena waxay hoos yimaadaan Madaxtooyada G.S.K.

Golaha Xoghayayaasha waxaa guddoomiye u ah Guddoomiyaha G.S.K. Goluhu wuxuu ka kooban yahay Xoghayayaasha iyo Guddoomiyaha.

Xoghayayaasha waxaa ka mid ah kuwo ku jira Golaha Sare ee Kacaanka.

Golaha Xoghayayaashu fulinta hawlaha dawladda mooyee wuxuu kala qayb galaa G.S.K. dejinta xeerarka wixii la xiriira iyo siyaasadda dawladda, sidaas darteed Golaha Xoghayayaalku shaqooyinka dawladdana way fuliyaan, xeerarkana wax bay ka dejiyaan mararka qaarkood.

Xoghaye kasta wuxuu mas'uul ka yahay shaqada Wasaaradda loo xil saaray. Wuxuuna awood u leeyahay kala beddelka shaqaalaha, kormeerka shaqada wasaaardda, xil saarka ama xil ka qaadka darajaadka intooda badan, warbixin ku saabsan shaqada Wasaaradda iyo wax alla wixii ku saabsan horumarka Wasaaraddiisa.

Xoghayuhu waa qof xil weyn ummadda u haya. Wuxuuna mas'uul ka yahay wasaarad ballaaran oo dalka ku fidsan sida Wasaaradda Waxbrashada iyo Barbaarinta, caafimaadka, gudaha iyo wixii la mid ah.

Haddaba waxaa waajib ah in qofka (Xoghayaha) xilkaas haya uu ahaado qof leh fiiro dheer, karti, dulqaad oo ah hawl kar, oo leh aqoon ahna xilkas tawri, waddani iyo caadil. Waxaa waajib ku ah Xoghayaha :

1. Inuu la socdo, oo ogaado shaqada iyo dhibaatada Wasaaraddiisa.
2. Inuu la socdo oo ogaado dhibaatada shaqaalaha, sida ay u shaqeeyaan iyo sida ay hawsha ugu kala wanaagsan yihiin si loo kala abaal mariyo.
3. Inuu ka shaqeeyo qorsheynta hormarinta Wasaaraddiisa isagoo la kaashanaya madaxda kale ee Wasaaradda.
4. Inuu leeyahay karti uu ku aqoon karo wuxuu qabtay iyo waxa ummaddu ka doonyso.

## DOWLADDA HOOSE

Hey'adda fulinta waxa la shaqeeya oo la fuliya hawlaha dalka golayaasha kacaanka ee **Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka**. Si loo fuliyo ujeeddooyinka kacaanka, horumar degdeg ahna loo gaaro, maamulka waddankana looga wada qaybgalo, looguna sinnaado maamulka iyo shaqada dalka oo aan qof keligi wax u xukumin ,ayaa loo sameeyey golayaasha Kacaanka ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka, waxaana lagu magacaabay **Dawladda Hoose.**

Dawladda Hoose waxay talada ka qaadataa maamulka ka sareeya iyada, markiise ay soo gudagasho arrin degdeg ah oo

u baahan wax ka qabad ayadaa goosata sidii arrintaas loo hagaajin lahaa.

Shaqooyinka ay qabato ama xilka saran Dawladda Hoose waxaa ka mid ah:

1. Inay fuliso qorsheynta ku saabsan horumarinta dalka ee ku kooban Gobolka, Degmada iyo Tuulada.

2. Inay tallaabo ka qaado wax alla wixii mashaariich ah ee lagama maarmaan u ah horumarka Gobolka, Degmada iyo Tuulada.

3. Inay ilaaliso nabadgeliyada iyo xasilloonaanta Gobolka, Degmada iyo Tuulada.

4. Waxay qayb ka qaadataa maamulka lagu dejinayo qorshyenta.

5 Waxaa kale oo ay qayb ka qaadataa go'aannada waa weyn ee siyaasiga ah ee lagu maamulo waddanka, tusaale ahaan: haddii qof ama labo amaseba in ka badan ay arrin u arkaan inay waxtar u leedahay xagga siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka, bulshada, iwm. waxay horkeeni karaan Guddiga Kacaanka ee Gobolka, Degmada, ama Tuulada, go'aankii ay gaaraan gudiyadaasi waxaa loo soo gudbiyaa Golaha Sare ee Kacaanka.

Qofka loo dooranayo inuu ka mid noqdo golayaashaa waxaa lama huraan ah inuu yahay:-

1. Qof ah waddani, dacaad, hawl kar, xilkas, oo muujiyey shaqo iyo xilkasnimo dheeraad ah;

2. Qof hanuunsan oo leh ildheeri siyaasi ah hal-aday oo aaminsan mabda' hantiwadaagga ah.

3. Qof leh karti iyo aqoon uu ku hindisi karo ra'yigiisa, oo uu kaga dhaadhacsiin karo dadka waxa uu doonayo.

4. Qof arki kara dhibaatooyinka bulshada, oo xil iska saara sidii looga gudbi lahaa dhibaatooyinkaas.

5. Qof fahmi kara hantida iyo awoodda ay dawladdiisu leedahay si ay uga soo baxdo xilkeeda.

## III. HAY'ADDA GARSOORKA

Hay'adda garsoorku waxaa weeye hay'ad muhim ah oo ka mid ah dhismaha dawladda, waxayna ka shaqaysaa socodsiinta cadaaladda iyo ilaalinta sharciyada.

**Dhismaheeda :**

Dhismaha hay'adda garsoorku wuxuu ka kooban yahay laba qayoobd : qaybta Maxkamadaha iyo qalbta Xeer Ilaalinta Guud.

B. Qaybta Maxkamadaha : waxay ka kooban tahay sida soo socota:

1. Maxkamadda Degmada.
2. Maxkamadda Gobolka.
3. Maxkamadda Rafcaanka.
4. Maxkamadda Sare.

### 1. Maxkamadda degmada:

Saldhigga Maxkamadda Degmadu waa magaalamadaxda Degmada, awoodeeduna waxay gaarsiisan tahay xuduudda Deg mada oo dhan, maxkamad kasta oo ka mid ah maxkamadaha degmda waxay leedahay laba qaybood oo ay midwalba leedahay garsoore waxayna yihiin:

B. Qybta Madaniga ah: taas oo baadha dacwooyin ka madaniga ah ee aynan qiimahoodu dhaafsiisnayn saddex kun oo shilin.

T. Qaybta Ciqaabta: taas oo gasha dembiyada aynan ciqaabtoodu dhaafsiisnayn saddex kun oo shilin amase saddex sano oo xarig ah amaseba labadaas oo la isku daray.

2. **Maxkamadda Gobolka:**

Saldhigga Maxkamadda Gobolku waa magaalamadaxda Gobolka, awooddeeduna waxay gaariisan tahay dhulka uu Gobolku ka koobmo oo dhan.

Maxkamadda Gobolku waxay u qaybsantaa laba qay-bood: qybta caadiga ah iyo qaybta Ciqaabta.

Shaqada Maxkamadda Gobolku waxaa weeye inay gasho dacwooyinka dhaafsiisan awoodda Maxkamadda Degmada.

3. **Maxkamadda Rafcaanka:**

Saldhigga maxkamadda rafcaanku waa magaalamadaxda gobolka, awooddeeduna waxay gaarsiisan tahay xuduudda go-bolka oo dhan, waxayna leedahay laba qaybood: qybta Raf-caanka caadiga ah iyo Rafcaanka ciqaabta.

Shaqada Maxkamadda rafcaanku waxaa weeye inay gasho dacwooyinka rafcaanka looga qaatay xukun ay horey u rideen maxkamadda degmadu amase maxkamadda gobolku.

4. **Maxkamadda Sare:**

Saldhigga maxkamadda sare waa magaalada Muqdisho, Caasimadda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, awood deeduna waxay gaarsiisan tahay dalka Jamhuuriyadda Dimoq-raadiga Soomaaliya oo dhan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo garsoorayaalka la shaqeeyaba waxaa soo magacaaba Madaxweynaha Jamhuuri-yadda Dimoqraadiga Soomaaliya isaga oo tixgalinaya ra'yiga Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Diinta.

Shaqada Maxkamadda Sare waxaa ka mid ah ilaalinta hirgelinta qawaaniinta iyo midaynta fasiridda qawaaniinta iyo wax alla wixii kale ee ay xaq u leedahay distoor ahaan iyo qaa-nuun ahaanba.

Waxaa kale oo ka mid ah shaqadeeda :

1. Duridda xukunka horey uga soo baxay Maxkamada-

ha rafcaanka iyo maxkamadaha kale ee dalka Jamhuuriyadda oo idil.

2. Duridda amarrada ka soo baxay maamulka (Idaaradda) guud.

3. Duridda xisaabaadka ay soo bandhigeen xisaabiyaasha hantida guud.

4. Duridda ku saabsan xukun ciqaab ah.

5. Waxaa kale oo ay baadhaa dooddii ku saabsan dhibaatada ka dhalata isdhexgalka shaqooyinka maxkamadaha.

**T. Xeer Ilaalinta Guud:**

Saldhigga Xeer Ilaalinta Guud waxaa weeye magaalada Muqdisho, waxayna ka kooban tahay Xeer Ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeenno iyo wakiilo la shaqeeya.

Shaqada Xeer ilaalinta guud waxaa ka mid ah socodsiinta Qawaaniinta, ilaalinta xuquuqda dawladda, ilaalinta xuquuqda hay'aadka guud ee kale iyo xuquuqda dadyawga aan ehelka lahayn.

Xeer ilaaliyaha guud si uu u hirgeliyo arrimahaas oo dhan waa :

1. Inuu isaga nafahaantiisu ama wakaalladiisu amaseba boolisku xil iska saaraan dacwooyinka Ciqaabta ah iyo baaristooda, waana inuu kaga hadlaa maxaakimta horteeda afka xeer ilaalinta guud.

2. Inuu ogaa amaseba uu farageliyaa dacwooyinka madaniga ah haddii ay keenayso nabadgeliyada danaha guud.

3. Inuu ku duro sida ay qawaaniintu u banaynayso xukunka ciqaabta iyo kan madaniga ahba.

Xeer ilaalinta guud waa inay la socoto baarista uu boolisku baaro dembiyad iyo dadkii sameeyeyba.

## Maxkamadda Badbaadada Ummadda

Maxkamadda Badbaadada Ummadda waxaa lagu asaasay sharcigii soo baxay 3-1-1970,kii waxayna ku xiran tahay Golaha Sare ee Kacaanka.

Maxkamadda Badbaadada Ummaddu waxay hirgelisaa sharciyada waddanka u dejisan ee ku saabsan nabadgeliyada iyo badbaadada ummadda.

Kacaanka kadib maxkamadihii waxaa laga dhigay Maxkamado dadweyn , maxaa yeelay garsoore kasta waxaa la fadhiya dad kaaliyaal ah oo dadweynuhu soo doortay. Garsooraha iyo kaaliyaalku waxay soo wada saaraan go'aanada ka soo baxa maxkamadda.

Sidaas waxaa loo yeelay in la hubiyo in dadku ka warhayo waxna ka hagaajiyo hawlaha maxkamadaha, ujeeddaduna waa in la sugo sharci iyo cadaalad loo gudboon yahay.

Maxkamaduhu waxay hayaan xil aad u weyn, waajibaadkoodu waxaa weeye inay sharciga si xaq ah oo sharciga waataqsan u fuliyaan. Ruuxii gardaran waa inay gardaradiisa tusaan, kii gar lehna waa inay u xukumaan gartiisa oo uu xaqiisa helaa.

Maxkamaduhu waa inay si madaxbannaani ah u baaraan runta dembiyada oo ay u xukumaan sida ay cadaaladdu tahay

**Laylis :**

1. Yaa madax u ah JDS?
2. Sideebay u dhisan tahay Dawladdu?
3. Qaybaha Dawladdu maxay qabtaan?
4. Maxay tahay shaqada Guddoomiyaha GSK?
5. Maxay tahay shaqada Xoghayuhu?
6. Maxkamaduhu maxay qabtaan?
.7 Maxay tahay shaqada Dawladda Hoose?
8. Sheeg Maxkamad kasta awoodeeda.

Casharka Afraad

## XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA QOFKA SOOMAALIYEED

Qofka Soomaaliyeed waajib ayaa dalka ka saaran, qofkuna xuquuq ayuu leeyahay. Xuquuqdaa waxaa ka mid ah:

1. Inuu xornimo ugu noolaado waddanka gudihiisa.
2. Inuu ka degi karo dalka meeshuu doono.
3. Inuu u socdaalo meeshuu doono.
4. Inuu ka shaqeysto dalka.
5. Inuu ka qayb galo wax alla wixii ku saabsan horumarka dadkiisa iyo dalkiisa.
6. Inuu qayb ka qaato maamulka siyaasadda dawladda.
7. Qofku waa inuu caddeyaa ra'yigiisa isagoo ku qoraya wargeyska amaba meel fagaara ah ku sheegi waxa uu u garanayo inay waxtar u leeyihiin danta guud ee waddanka.
8. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho iyo in caafimaadkiisa la daryeelo.
9. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in maalkiisa iyo naftiisaba nabadgeliyo loo siiyo, taasna macnaheedu waxaa weeye in isbitaallada, daawada, waxbarashada iwm ay dawladdu u maamusho si loogu wada sinnaado.

Qofka soomaaliga ah waajib weyn ayaa dusha ka saaran, waxaana ka mid ah:

1. Inuu u hogaansamo sharciga dalka lagu maamulo.
2. Inuu bixiyo canshuurta laga doonayo.
3. Inuu ilaaliyo nabadgeliyada bulshada iyo xoolaheeda.
4. Inuu la shaqeeyo Ciidammada nabadgeliyada dalka.

5. Inuu difaaco dalkiisa iyo mabda'iisa kacaanka ah.

6. Inuu ka qayb galo dhismaha dalka ee lagu fulinayo mabda'a Iskaa wax u qabso iyo ololayaasha kale ee dalka ka socda.

7 Inuu ka xoroobo maskaxdii hore ee dibusocodaka ahayd ee ay musuqmaasuqii iyo shisheeyihii wax ku maamuli jireen.

8. Inuu ka qayb galo maamulka dhaqaalaha, ijtimaaciga iyo siyaasadda dalka.

9. Inuu qayb ka qaato guddiyada hoose iyo shaqada ummadda loo qabanayo.

10. Inuu ka qayb galo arrimaha Xafiiska Siyaasadda ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.

**Layli :**

1. Maxay yihiin xuquuqda uu qofku leeyahay?
2. Waa maxay waajibaadka qofka ka saaran dalkiisa?
3. Wax ka sheeg xuquuqda waalidka.
4. Arday kasta maxay yihiin waajibaadka saaran?
5. Ka sheekee mashaariicda aad waddanka uga qayb-gashay.

## Casharka Shanaad

## ISKA *W*AX U QABSO

### Macnaheeda Guud



**Is-aaminsanaan, isku kalsooni, Isku tashi ummadnimo.**

Iskaa... waa mabda' dhaxalgal ah, taabaqaad ah, oo dhaqan galay. Waa fikrad xorriyadeeda, isku kalsooni, is-aaminsanaan, iyo isku tashi ummadnimo. Waa madaxbannani ay ummadi u madaxbannaan tahay siyaasadeeda gudaha iyo tan dibadda. Waa is-aaminsanaan uu shacab is-aamino oo uu ku kalsoonaado awoodiisa iyo kartidiisa aan dhammaadka lahayn ee uu ku qabsan karo wuxuu doono, kuna arki karo meel alla meeshuu calaamadsado ee uu rabo inuu gaaro. Waa isku kalsooni ay ummadi ku kalsoonaato saddexeeda «m» maskaxdeeda, muruqeeda iyo maalkeeda, xooggan saddexan ee isku dhafan oo marka si fiican laysugu hannaaniyo, si fiican loo qorsheeyo., iskoodana loo siidaayo, suura geliya wax kasta oo loo qabo inaynan ahayn suura gal.

Taasi waxay iman kartaa, ama la gaari karaa marka ay ummaddi ka caafimaaddo damiirka, caafimaadka damiirka iyo xorriyadda maskaxda waxaa la gaari karaa marka laga adkaado guntinta (cuqadka) nafsiga ah, Khuraafaadka beenta ah, isku halaynta cid kale iyo waayo sugga, shisheeye raaca, caajiska, keli cunka iwm.

Mabda'a sidaas ahi wuxuu ku dhafan yahay nolosha beesha, wuxuuna wadaa oo uu ka shaqeysiiyaa laamaha kala duwan ee la xiriira shaqooyinka shacabka (Dawladda).

Haddii la koobo, waxaa la oran karaa, iskaa... waa isku tashi ay ummadi iskaga tashato meel kasta oo nolosheeda la xiriirta: dadnimada iyo aragtida maskaxda ee qofka, dhismaha dhaqaalaha oo ay ka dambayso fikradda ah: isdirka iyo isxilqaanka, rumaynta aad rumaysan tahay in aad leedahay dalka aad ka shaqaysanaysid.

Dalku shirkad laga shaqaysto ma ahee waa hantidaadii. Shirkadda aad ka shaqaysatid saacadaa lagula xisaabtamaa, ribix baa lagu doodaa. Hantiwadaagga iyo Iskaa wax u qabso waa isu asal iyo farac. Hantiwadaaggu waa asalkii. Iskaa wax u qabsana waa faracii. Iskaa wax u qabso waa han weyn iyo siaqoonsiga ummadnimo, xagga difaaca oo ah difaaca dadweyne, xagga siyaasadda oo ah madaxbannaani guud, xagga hoggaaminta oo iyana ah hoggaamin dadweyne iyo kala dambayn: madaxtinimo iyo shaqo laga dambeeyo, xagga waxbarashada waa taclaan dimuqraadi ah. Marka Iskaa . . waa isdeeq, iyo isku fillaan meel ksata aad iskaga fillaatid. Isku fillaan waa gobanimo buuxda. Haddaba, iskaa wax u qabso waa gobanimo buuxda, labadeeda heerba;

Heerka qofnimo iyo heerka Ummadnimo. Sida uu mabda'aasi meel kasta nolosha ugaga jiro, waxaad ku qaadan doontaan sanooyinka soo socda.

**Layli :**

1. **Waa** maxay Iskaa Wax u Qabso?

1. Soomaaliya, goormay bilaawday inay ka faa'iideysato mabda'aas?

3. Iskaa Wax U Qabso, xaggee ayey gashaa?

4. Ka sheekee meelo aad kaga shaqeysey Iskaa Wax U Qabso.

5. **Samee masawir** ay ka muuqato Iskaa Wax U Qabso?

## Casharka Lixaad

# NAFTI HURE

## — S H E E K O —

### Xiddigle Maxamad Cabdulle Xalane

Maxamad Cbdulle Xalane wuxuu ku dhashay CeelBuur oo ka tirsan Gobolka Galguduud, sannadku markuu ahaa 1937kii.

Qoyska uu ka dhashay aad iyo aad ayey diinta Islaamka ugu xeel dheeraayeen. Maxamad wuxuu mar walba jaclaa sheekooyinka ku saabsan geesinnimada daafaca dalka iyo xornimada Soomaaliya.

Marka dadka waayeelka ahi ka sheekeynayaan Sayid Maxamad iyo Daraawiishtii ama Axmed Gureyba wuxuu u qabay xiiso weyn dhegeysiga sheekooyinkaas. Wuxuuna necbaa cadowga dalkeenna gaar ahaan Xabashida, aad buuna u jeclaa inuu Xabashida la dagaallamo, qiiro gooni ah ayaa qaban jirtey marka uu maqlo Xabashi ayaa dhulkeenna haysata.

Markay xabashidu dad Soomaali ah laayaan dhiiggiisa ayaa dhaqaaqi jirey. Xalane wuxuu goostay inuu ka mid noqdo ciidammadda qalabka sida, sidaas daraadeed ayuu 1960kii ugu biiray Xoogga Dalka Soomaalyeed. Wuxuuna caan kaga noqday askarta dhexdeedii: waddaninimo, geesinnimo iyo usluub wanaagsan, sidaas awgeed sannad qura markuu shaqeeyey wuxuu qaatay **Alif.**

Sannadku markuu ahaa 1964kii ayey Xabashidu ku soo duushay soohdinta dalkeenna inta xorta ah, Xalane aad ayuu u farxay markii askar uu ka mid yahay loo diray Togwajaale oo ka mid ah Gobolka Waqooyi galbeed.

Maskaxdiisana waxaa ku jirtey inaynan Xabashidu waxba

ka qaadi karin Soomaalida, oo aan guul kala kulmayno goobaha dagaalka.

Saaxibadiisii askarta ahaa wuxuu kala sheekeysanayey geesinimada Soomaalida iyo dagaalyahannadoodii iyo fuleynimada Xabashida gaar ahaan waqtiga habeenkii ah.

Maalin maalmaha ka mid ah ayey ciidankii Soomaalida iyo Xabashidu foodda isa saareen.

Ciidanka Xabashidu wuu ka tira badnaa kan Soomaalida; hub culus oo uu Maraykanku siiyey ayey Xabashidu wadatay. Markii uu dagaalkii socday intii muddo ah oo ay khasaaro gaadhay labada dhinacba haba u badnaadeen dhinaca Xabashide, ayuu Xalane wuxuu arkay Calankii Soomaalida oo suran meel ay Xabashidu ku soo dhowdahay. Xalane wuxuu ku tashaday inuu calankiisa ka dhacsado cadowga, oo uusan uga tegin. Saaxiibadiis waxay ka dooneen inuu godkiisa ku dagaallamo inta uu xaalku fududaanayo, isaguna wuxuu ka baqay in Xabashidu calanka furato. Si degdeg ah ayuu saaxiibadiis uga soo dhex baxay oo intuu orday calankii ka soo furay meeshii uu surnaa.

Soo laabadkii Xalane isagoo calankiisii sita ayuu cadowga Xabashidu isku mar ku furay xabbado. Xalane waxaa ku dhacday 20 xabbadood, wuxuuna soo gaaray saaxiibadiis isagoo calankii ku duuban oo gurguuranaya, si xunna u dhaawacmay kadibna wuu geeriyooday. Danta Xalane waxay ahayd inuu ka badbaadiyo calankiisa cadowga, markii uu nafba, xayey Xalane wuxuu yiri:

Cadawgu bir ma ahee burburiya.

Calankayaga u diida cadowga.

Ciiddayda u diida cagta Xabashada.

Xalane wuxuu geeriyooday 29 Maarso 1964kii isaga oo geesinimo muujiyey. Sannadku markuu ahaa 1972kii ayaa xalane lagu darajeeyey isagoo la gaarsiiyey Xiddigle. Waxaana

Madaxweynuhu siiyey 1972 Billad dahaba ah, Xalane waa qofkii soomaalida ugu hareeyey ee la siiyey billad dahab ah.

Qofkasta oo Soomaali ah wuu xusuusan yahay geesinnimadii Xalane, wax badanna waa looga sheekeynayaa dhallaanka soo koraya.

Xalane muuqiisa ayaa la waaye mooyee magac dheer ayuu ka tegay. Xalane waxaa loogu magac daray dugsigii isagaba lagu taba baray, saraakiill iyo askar badanna lagu tababaro.

Dugsigaas waxaa lagu magacaabi jirey «BOTTEGO» waxaana magacaas lahaa nin madax u ahaa dugsiga xornimadeenna ka hor, oo Talyaani ahaa. Dugsiga Xalane waxaa lagu siiyaa tababarro kala geddisan shaqaalaha dawladda iyo ardayda dugsiyada sare ka soo baxda.

Qof kasta oo Soomaali ah waxaa waajib ku ah inuu ku daydo geesigii Xalane oo uu naftiisa u huro daafaca dalkiisa iyo calankiisa intaba.

**Layli :**

1. Goormaa, xageebuuse ku dhashay Xalane?
2. Goormuu Xalane ku biiray Xoogga Dalka?
3. Muxuu caan ku ahaa Xalane markuu yaraa?
4. Maxaa Xalane markiiba shaqada loogu jeclaaday?
5. Sideebuu u geeriyooday Xalane?
6. Muxuu yiri Xalane markii uu dhimanayey?
7. Sideebaa loo sharfay Xalane?

8. Macnee maahmaahda soo socota: (Waari mayside war ha kaa hadho)

9. Waxaad qortaa sheeko ku saabsan geesi ku dhintay dagaalladii dhexmaray Soomaaliya iyo Xabashida

10. Ka sheekee geesinimada Soomaalida.

11. Sawir masawir tlimaamaya geesinimada Xalane.

## Casharka Toddobaad

### Cumar Bin Khadaab : waa caadil Muslin ah :

Cumar wuxuu ahaa khaliifkii Rasuulka ee labaad, wuxuuna caan ku ahaa nin dadka aan iska sarreysiin. Cumar nolo-shiisu intuu khaliifka ahaa waxay ahayd mid caadi ah, wuxuuna cuni jiray muufo qalalan iyo timir sida dadka kale oo dhan. Wuxuu fariisan jirey masaajidka gudihiisa sida muslimiinta caadiga ah oo kale. Cumar wuxuu ahaan jirey ninka masaajidka ugu dambeeya fadhigiisa, wuxuuna u yeeli jirey isaga oo mar walba dadka dhibaatooyinka haysta wax ka qabanayey, wuxuuna ku dadaali jirey inuu la socda dhibaatooyinkaas. Dadka muslinka ahi way u imaan jireen Cumar, waxayna weydiin jireen arrimaha ku saabsan diinta, dawladda iyo wax walba, qof kastana wuu deeqsiin jirey.

### Naxriistii Cumar

Boqorradii waagaas jirey intooda badan uma naxriisan jirin dadweynaha mana ilaalin jrin dantooda.

Laakiin Cumar wuu u naxariisan jirey dadka shaqeeya iyo kuwa aan shaqeynba. Cumar wuxuu hantida Beytul maalka dawladda ka kaalmeyn jirey caruurta aabbaha iyo hooyada aan lahayn, agoonta, xujayda, dadka gaboobay iyo masaakiinta oo dhan. Waagii uu Cumar xukumi jirey dawladda Islaamka ah waxaa dhacday mar ka mid ah gaajo xun oo dadkiisa gaartay. Cumar markaas wuxuu ku dadaalay inuu kaalmeeyo dadka masaakiinta ah

Wuxuuna naftiisa ka celiyey cuntada wanaagsan, wuxuuna oran jirey: sideebaan ku cunaa cunto wanaagsan? Ayadoo umadaydu gaajeesan tahay.

### Aaminimada Cumar

Cumar wuxuu ahaa nin aamin ah oo aad ugu dadaala ammaanada sida loo dhawro, waagiisii waxaa jirey dagaallo fara

badan. Ciidankiisuna wuxuu soo heli jirey xoolo badan oo uu cadowga ka qaato mararka uu ka adkaado. Diinta Islaamkuna waxay na fareysaa xoolahaas in meel la dhigo, waxaana iska leh dadweynaha. Qaar xoolahaas ka mid ah waxaa loo qeybinayaa dadka dagaalka ku jirey. Qaarka kalena waxaa lagu darayaa maaliyadda Baytul maalka, waxaana lagu daryeelayaa danaha guud. Cumar wuxuu wax ka siin jirey maalkaas masaakiinta iyo carruurta aabaha iyo hooyada aan lahayn, waxaa kale oo uu siin jirey dadka aan shaqada awood u lahayn ee gaboobay amaba buka. Beytulmaalka waxa kale oo laga bixin jirey mushaharada ay shaqaalahu qaataan.

Waxaa kale oo uu Cumar maalkaas ku hagaajin jirey waddooyinka, dugsiyada, masaajidda, isbitaallada iwm. Cumar ma uusan oggolaan jirin maalkaas in uu ku bixiyo meelaha aynan diintu banayn ama aynan farin, isaguna uguma isticmaali jirin si ka baxsan sida ay diintu fartay.

Marbay gabar uu Cumar dhalay waxay ku tiri: «Aabo wax iga sii maalkaan faraha badan». Cumar wuxuu yiri «Kan maalkayga ma aha, kani, waa maalkii Islaamka oo dadweynaha muslimiinta ah ayaa wada leh, awoodna uma lihi inaan ku siiyo». Mar kalena nin qaraabadiis ah ayaa Cumar u yimid wuxuuna ku yiri: «dhibaataa i haysata, wax aan cunno ku iibsado ma haysto, deyn ayaana la igu leeyahay, haddaba waxaan kaa doonayaa inaad i siisid lacag aan ku gato cunto, deyntana aan iskaga bixiyo.»

Markaas Cumar wuxuu ugu jawaabay, «Awood uma lihi inaan qaraabadayda siiyo maalka dadweynaha, laakiin waxaan kugu taageerayaa maalkayga gaarka ah inaan wax kaa siiyo».

## Caadilnimada Cumar

Cumar Binu Khadaab wuxuu la dagaali jirey dulmiga, cadaalad darrada iyo wax kasta oo sharciga ku xad gudbaya. Cumar wuxuu wax ku xukumi jirey sida cadaaladda Diinta Islaamku na fartay. Cumar wuxuu ahaa xaakim caadil ah, dantiisuna waxay ahayd inuu dadka muslinka ah raali geliyo. Dadkana ma kala soocin jirin. Qof kastana wuu tegi ka-

rey maxkamadaha waqtigii uu doono. Sharciga hortiisa masaakiinta iyo mudanayaashu way ku sinnaayeen. Had iyo jeer Cumar wuu kormeeri jirey maxkamadaha, isagoo baaraya sida ay garsoorayaashu wax u xukumaan, wuxuuna fari jirey inay mar walba cadaaladda oogaan. Marbaa waxaa tartamay ina Camru Binul-caas iyo wiil kale oo masar ah, waxaana raayey wiilkii masaarida ahaa, waqtigaasna masar waxaa xukumi jirey Camru Binul-caas. Wiilkii laga raayey wuu cadhooday isagoo isku halaynaya xukunka aabihiis. Markaas ayaa wiilkii masaarida ahaa la karbaashay. Wiilkii Masaarida iyo Aabihi inta ay ka tageen Masar ayey u dacwoodeen Cumar Binu Khadaab oo joogay xaruntii dawladda Islaamka Madiina - al Munawara.

Cumar (allah ka raali noqdee) wuxuu dhexmariyey labadii wiil dood ku dhisan caddaalad iyaga oo ay labadii aabayaw joogaan maxkamadda. Doodaas kadibna Cumar wuxuu xukumay in uu wiilkii masaarida ahaa garaaco wiilkii xaakimkii Masar isaga oo uu aabihiis arkayo.

Markaas ayuu Cumar yiri xikmaddii wanaagsanayd ee lagala hadhay caadilnimadiisa ee ahayd «Goormaad dadka addonsateen iyaga oo ay hooyooyinkood ku dhaleen xornimo».

LEYLI:

1. Muxuu ahaa Cumar Bin Khadaab?
2. Yuu ku kaalmeyn jiray hantida dowladda?
3. Wax ka sheeg Aaminimada Cumar?
4. Sidee buu Cumar u xukumay dagaalkii wiilkii Cumar Bin Caas iyo wiilkii Masaarida?

## Casharka Siddeedaad

# JAAMICADDA DAWLADAHA CARABTA

## AASAASKII JAAMICADDA DAWLADAHA CARABTA

Ururka Jaamicadda dawladaha Carabtu wuxuu ka mid yahay ururrada caalamiga ah, waxaana la aasaasay 22kii bishii maarso 1945kii. Sidaas awgeed ayaa looga dhigay 22ka bisha maarso sannadkii walba Ciidda Jaamicadda Carabta. Dawladihii ka qaybgalay aasaaskii Jaamicadda Carabta waxay ahaayeen toddoba dawladood, waxayna ahaayeen dawladaha. **MASAR, SUURIYA, URDUN, LUBNAAN, SUCUUDIYA, CIRAAQ IYO YAMANTA WAQOOYI.**

Heeshiiskii Jaamacadda Carabtu wuxuu caddaynayaa inay u bannaan tahay dawlad kasta oo Carab ah oo gobannimadeeda qaadata in ay ku soo biirto Jaamacadda Carabta. Sidaas darteed dawladaha ku jira Jaamicada Carabta waxay dhan yihiin hadda labaatan dawladood, waxaana ugu dambaysay Soomaaliya oo ku biirtay 1974kii.

Dawladaha uu ka koobmo Ururka Jaamicadda Carabtu qaarkood waxay ku yaallaan qaaradda Afrika, kuwa kalena waxay ku yaallaan qaaradda Aasiya.

Kuwa ku yaal qaaradda Afrika waxay yihiin dawladaha : Masar, Liibiya, Tuunis, Jasaa'ir, Maqrib, Moriitaaniya, Soomaaliya iyo Suudaan. Kuwa ku yaal qaaradda Aasiyana waxay yihiin: Suuriya, Ciraaq, Sacuudiya, Kuweyt, dawladda Imaaraadka Carabta, Baxrayn, Qadar, Cumaan, Jamhuuriyadda Carabta Yaman, Jamhuuridda Dimuqraadiga ee dadka Yaman iyo Lubnaan.

## T. UJEEDDADA JAAMICADDA DAWLADAHA CARABTA

Ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay ururka Jaamicadda Dawladaha Carabta waxaa weeye in ay noqoto unuggii

midnimada dadyowga Carabta, si loo gaaro dawlad keliya oo Carab ah oo koobta dalalka Carabta oo dhan.

Ururka Jaamicadda Dawladaha Carabtu si uu u gaaro ujeeddadiisaas weyn, wuxuu leeyahay ujeeddooyin kale oo ku meelgaar ah oo ay ka mid yihiin:

1—Taageerada dadyowga Carabta ee gobannimadoonka ah iyo la dagaallanka gumeysiga cusub.

2—Iskaashiga dawladaha Craabta xagga: siyaasadda, dhaqaalaha, cilmiga, waxbarashada, caafimaadka, difaaca iwm.

3 — Iskaashiga dawladaha Carabta xagga gaadiidka dhulka, badda, cirka iyo isgaadhsiinta.

## J — DHISMAHA JAAMACADDA DAWLADAHA CARABTA

Saldhigga Jaamicadda Carabtu waxaa weeye magaalada Qaahira ee ah xarunta dalka Masar, Jaamicaddu waxay u dhisan tahay sida soo socota :

### 1—GOLAHA JAAMICADDA:

Golahani waxaa weeye hay'adda ugu sarreysa ee Jaamicadda Carabta, wuxuuna ka shaqeeyaa sidii ay Jaamacaddu ku gaari lahayd ujeedadeeda. Goluhu wuxuu ka kooban yahay danjirayaasha u fadhiya dawladaha ku jira Jaamicadda Carabta xarunta Jaamicadda.

Golahani wuxuu shiraa caadi ahaan sannadkiiba laba jeer, Bilaha Maarso iyo Oktoobar, waxaa kale oo uu si caadi ah u shiraa kol alla kolkii ay Jaamicaddu isugu yeerto, waase haddii ay ugu yaraan laba dawladood oo ka mid ah dawladaha ku jira Jaamicadda wayiistaan shirkaas.

### 2 — GUDDIYADA JOOGTADA AH:

Jaamicadda Carabtu waxay leedahay guddiyaal badan oo

khubaro iyo faniyiin ah, waxaana lagu magacaabaa guddiyada joogtada ah, golaha Jaamicadda Carabtu wuxuu u magacaabaa guddi kasta oo ka mid ah guddiyadan qof madax u ah ugu yaraan laba sannadood, guddiyadani waxay ku shiraan magaalada Qaahira, waxaase u banaan inay ku shiraan dal kasta oo ka mid ah dalalka ku jira Jaamicadda Carabta haddii loo baahdo.

## 3—XOGHAYNTA GUUD:

Xoghaynta guud waxaa weeye hay'ad ka mid ah hay'adaha Jaamacadda Carabta, shaqadeeduna waxaa weeye qorsheynta, socodsiinta iyo fulinta go'aannada golaha Jaamicadda iyo guddiyada joogtada ah, saldhiggeeduna waxaa weeye magaalada Qaahira.

Xoghaynta guud waxaa ka madax ah Xoghayaha guud, waxaana soo doorta golaha Jaamicadda, markii la dooranaayo Xoghayaha guud waxaa shardi ah in ay oggolaadaan ugu yaraan lab saddexaad dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta.

Xoghayaha waxaa ku caawiya shaqadiisa afar qofood oo lagu magacaabo kaaliyayaasha Xoghayaha guud.

Xoghaynta guud waxay ka kooban tahay laamaha soo socda:-

1 — Guddiga siyaasadda.

2 — Guddiga arrimaha dhaqaalaha.

3 — Guddiga arrimaha saqaafada.

4 — Guddiga arrimaha bulshada iyo caafimaadka.

5 — Guddiga arrimaha qawaaniinta.

Guddi kasta oo ka mid ah Guddigaas hawlaheedu waxay ku soo kooban yihiin sida ay uga fulin lahayd go'aannada golaha Jaamicadda Carabta waxa iyada u gaarka ah.

## X — GUULLAHA UU GAARAY URURKU

Markii saddex bilood laga joogay aasaaskii ururka ayey Lubnaan iyo Suuriya ku kaceen gumeysiga Faransiiska sannadku markuu ahaa 1945kii. Ururku taageero buuxda ayuu sii yey Suuriya iyo Lubnaan. Waxaa kale oo uu taageero xoog leh siiyey Aljeeriya markii ay la dagaallameysey gumeysiga Farannsiiska.

Wuxuuna goostay in ciidamo loo diro dalkaas. Kaalin weyn ayuu Ururku ka geystey sidii loo aqoonsan lahaa xornimada Aljeeriya iyo si sharcinnimo ah inay ugu taliso aayahaheeda.

Dagaalkii Aljeeriya iyo taageeradii Ururka Jaamicadda Carabtu waxay keeneen inay Aljeeriya qaadatay xornimadeeda 1962kii.

Soomaaliya wax badan ayey ka xunuunsataa dhibaatooyinka uu gumeysigu ku hayey dawladaha Carabta. Taag iy tabarna way u geysatey, Dawladaha Carabtuna sidoo kale ayey isu garab taageen Soomaaliya, waxaan xusuusanahay Kamaludiin Saalax» oo ahaa Masar laguna dilay Soomaaliya markii uu gumeysigu u sameeyey shirqool taariikhdu markay ahayd 17kii Abril 1956. Ninkaas oo aad uga qiirooday foolxumada uu gumeysigu ku sameynaayey dalkeenna, wuxuu ku dadaalay inuu dadka Soomaaliyeed u cadeeyo ujeeooyinka gumeysiga. xiriirkaas kala duwan ee aan soo sheegnay ayaa ka dhexeeyey Soomaaliya iyo dawladda Carabta.

Markaan eegno dhincyadaas iyo dhinaca siyaasadda intaba waxaad moodaa inay dabeeci ahayd inay Soomaaliya ku biirto Ururka Jaamicadda Carabta. 14kii Fabraayo 1974kii waxay ahayd maalin weyn oo dadka oo dhani ay isu soo baxeen, si loo taageero go'aanka ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Guulaha kale ee uu Ururkaas gaaray waxaa ka mid ah in markii uu gumeysigii Tayaanigu

doonay inuu Liibiya kala qaybiyo, Ururka wuxuu weydiistey Ummadaha Midoobay in Liibiya loo ogolaado madaxbannaanideeda oo aan la kala qaybin. Ururku wuxuu ku dadaalay mideynta Ummadda Carabta, wuxuu taageerayaa dawladaha Carabta ee soo korayo iyo kuwa u halgamaya gobannimadooda.

**Lalyli :**

1. Goormaa la asaasay Ururka J. Carabta?
2. Waa maxay ujeedooyinka laga leeyahay Ururkaas?
3. Goormuu shiraa Ururku?
4. Sheeg tirada dawladaha Ururka ku jira iyo qaarraddaha ay ku yaaliin.
5. Maxay u kala baxaan gudiyada Ururka J. Carabtu?
6. Waa maxay guulaha uu gaaray Ururku?

## Casharka Sagaalaad

# SOOMAALIYA WAA XUBIN KA MID AH URURKA

## Jaamicadda Dawladaha Carabta

Soomaaliya waa xubin ka mid ah Ururka Jaamicadda Carabta, waana xubintii 20aad ee ururkaas.

Dawladdeennu waxaa weeye tii ugu dambeysey ee gashay ururkaas, ilaa haatan. Waxaa jira sababo oo aan uga mid noqonnay ururkaas. Innaga iyo dawladaha kale ee ku jira U.J.C. waxaan nahay dad walaala ah oo meel kasta iskaga mid ah. Waxaana ka mid ah meelaha aan iskaga midka nahay:-

1. **Dhaqanka:** innaga iyo Ummadaha Carabtu waxaan nahay dad weligood walaala ahaa, isku dhaqan ah, oo isku dabeecad ah.

Dhaqankaas isku midka ahi wuxuu ka yimaadaa intiisa badanı:

**B. Diinta Islaamka:** Diintu waa xariga weyn oo isku xira dalalka Islaamka ah guud ahaan, Soomaaliya iyo Carabtuna labaduba wax badan ayey ku soo dhaqmeen diinta Islaamka, iyadayna isku xukumaan, isku guursadaan, oo ay qoyska ku unkaan. Diintu sida ay farayso ayeyna isugu nariistaan.

Waxaa kale oo ay keentay midnimada diinta Islaamku waxbarasho isku mid ah. Fikiraad, shucuur, yididiilo iyaguna isku md ah.

### T. Darisnimada iyo Isdhexgalka

Carabta iyo Soomaalidu weligood daris bay ahaayeen, waxay wadaagaan Badda Guduudan, taas oo aan had iyo jeer isaga gudbi jirney. Derisnimadaas iyo dhaqankaas isku midka ahi waxay keeneen in ummadaheennu isdhexgalaan. Waxaa

kale oo ay keentay inay isweydaarsadaan waay-aragnimada nolosha.

Marka waxaan oran karnaa dhaqan ahaan isku dad baan nahay, isku ummad baan nahay.

**2. Dhaqaalaha :**

Soomaalida iyo Carabtu weligood waxay lahaayeen xiriir dhaqaale, waxay kala gadan jireen badeecadaha. Qolo waxa ay hayso qolada kale ayaa ka qaadan jirey, sidaas ayuu dhaqaaluhu isugu xirnaa hadda ka hore, haatanna waa isku xiranyahay.

3. **Siyaasadda :**

Xagga siyaasadda annaga iyo Carabtu iskaga mid baan nahay, isku cadow baan nahay. Cadowgayagu waa gumeysiga na wada qabsaday, haddana dagaal baan ku wada jirnaa. Waxaan la dagaallamaynaa gumeysiga cusub, imberiyaaliyadda, sahyuuniyadda (Yuhuudda) iyo midabtakoorka. Sidaas darteed siyaasad ahaan waan isbahaysannaa. Waxaannu ka mid nahay dawladaha ay siyaasaddooda dhexdhexaadka tahay.

4. **Xagga Taariikhda :**

Annaga iyo Ummadaha Carabtu intii aan jirney waa isniqiin meel kastana xiriir baan ka lahaan jirney. Ganacsiga, diinta iyo siyaasadda isku midka ahna waxay noo abuureen taariikh isku xiran. Sidaas daraadeed taariikhda Soomaaliya iyo tan dawladaha Carabtu waa mid isku mid ah, oo aan marna la kala sooci karin.

5. **Isu Hiilinta:-**

Haddii lagu soo duulo ummad ka mid ah ummadaha ku jira Jaamicada Carabta inta kale way u hiiliyaan. Hadaan tilmaan u soo qaadno dagaalladii ka dhacay Bariga Dhexe san-

nadihii 1956, 1967 iyo 1973 ee dhexmaray Carabta iyo Yahuudda, gaar ahaan Maar iyo Suuriya iyo Yuhuudda oo ay taageerayeen gumeystayaasha reer galbeed, ummadaha Carabta ee kale Soomaaliya way u soo hiiliyeen dawladihii Carabta ahaa ee dagaalka galay. Annaga Soomaalida ah markii aan la dagaallameyney gumeysiga, Carabtu waxay noogu hiilliyeen dad iyo duunyaba.
rabtu waxay noogu hiiliyeen dad iyo duunyaba.

Kamaaluddiin Salaax wuxuu ahaa nin geesi ah oo Masar u dhashay, wuxuuna ku dhintay dagaalkii gobannimodoonkii Soomaaliya. Hadii aan taariikhda dib ugu noqonno markii uu Axmad Gurey la dagaallamayey Amxaarada iyo dagaalladii kaleba, carabtu iyagaa noo kaalmeeyey. Waxyaalahaas oo dhan marka aad eegtid waxaad arkaysaa in annaga iyo Carabtu aan nahay dad walaala ah oo meel kasta iskaga xiran, oo aan kala maarmin, Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu yiri: «Tallaabada ah gelitaanka Jaamicadda Carabtu waxay ahayd mid aan asiibnay, waana tii ugu qumanayd intii aan tallaabo noocaas oo kale ah aan qaadnay.»

Layli:

1. Ka sheekee kaalinta diinta Islaamka ahi ku leedahay xiriirka dawladaha Carabta ee ku wada jira Jaamicadda Dawladaha Carabta.

2. Wax ka sheeg xiriirradii u dhexeeyey Soomaaliya iyo dawladaha Carabta.

2. Ka sheekee sida ay u aqbaleen dadka Soomaaliyeed fikradda ah ku biiridda Jaamacadda dawladaha Carabta

## Casharka Tobnaad

## CIIDAHA SOOMAALIYA

Dalkeennu wuxuu leeyahay ciido badan oo kala duwan sannad walba. Ciidahaasina waxay na xusuusinayaan taariikhdeena iyo caadooyikeena. Waxayna u kala baxaan kuwo waddani ah iyo kuwo diini ah.

### B. Ciidaha Waddaniga ah waxaa ka mid ah:

### 1 — Ciidda Calaanka Soomaal*i*yeed :-

12ka Oktoobar sannadkii walba waa maalinta ciidda calanka Soomaaliyeed, waa maalintii calanka la saaray, oo calankii shisheeyaha qiimihiisu lumay. Ciiddaasi way ka duwan tahay ciidaha kale ee waddaniga ah, ciiddaas shaqada lama joojiyo, laakiin waa loo dabaaldeggaa, calammo iyo nalal qurux badan ayaa jidadka lagu xiraa.

Maalinta 12ka Okt Calanka Soomaaliyeed waxaa la saaraa xafiisyada dawladda, guryaha, dugsiyada, isbitaallada iwm.

### 2. Ciidda 26ka Juun:-

26ka Juun waa maalintii ay xorowday qaybta waqooyi ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, waa maalin ay dhabowday xorriyada Soomaaliyeed gaar ahaan dhinaca waqooyi. 26kii Juun 1960kii gumeysigii Ingiriiska ayaa ka baxay qaybtaas dhulkeenna ka midka ah. Qof kasta oo Soomaali ah wuxuu ku farxaa gobannimada iyo guusha maalintaas la gaaray.

Sannad walba waxaa loo sameeyaa dabaaldeg maalinta 26ka Juun. Dhammaan shaqaalaha, dhallinyarada, hooyooyinka, guulwadayaasha iyo dadweynuhuba, waxay u soo baxaan jidadka iyo meelaha fagaaraha ah iyagoo faraxsan oo u dabaaldegaya ciidda 26ka Juun.

Waa inaynaan iloobin 26ka Juun. Waayo waxay masilaysaa midnimada iyo xornimo jacaylka Soomaaliyeed.

### 3 — Ciidda Kowda Luuliyo ;-

Kowdii Luuliyo 1960kii waa maalintii ay gobannimada qaadatay qaybta koonfureed ee Soomaaliya, lana midowday qaybtii kale ee waqooyi. Waxayna abuureen Jamhuuriyadii xorta ahayd ee Soomaaliyeed. Taas oo ah J.D.S. ee maanta. Maalintaas gumeysigii Talyaaniga ayaa ka baxay qaybtaas.

Labada qaybood ayaa isku darsamay, Muqdisho waxay noqotay magaalamadax. Maalinta 1da Luuliyo dhammaan shaqaalaha iyo dadweynuhu waxay isugu yimaadaan gagiyada waaweyn ee ku yaalla magaalooyinka, degmooyinka iyo tuulooyinka iyagoo xiran dharka hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed. Sida 26ka Juun meel kasta waa la qurxiyaa, dadkuna waa wada faraxsan yihiin.

Waa inaynaan iloobin Kowda Luuliyo. Waayo waxay masalaysaa xornimada iyo midnimada Soomaaliyeed.

### 4 — Ciidda 21ka Oktoobar :-

21ka Okt. Waa maalin ay ummadda Soomaaliyeed ku faraxdo, maxaa yeelay waa maalintii ay dhalatay Tawradda barakaysan. Maalintaas waxay ka xorowday ummadda Soomaaliyeed xukunkii ku dhisnaa musuqmaasuqa, qabyaaladda iyo qaraabakiilka ee ku xirnaa gumeysiga cusub. Waa maalintii uu dhashay nidaam siyaasi ah oo u hogaamiya dalka Soomaaliyeed horumar, bashbash iyo barwaaqo.

21ka Okt. waa maalin qiimo weyn ugu fadhida dadka Soomaailyeed, sannad kastana waa la xusaa maalintaas.

Guri kasta iyo meel kasta waa la nadiifiyaa, calanka waxaa la suraa xafiisyada, guryaha iyo waddooyinka, magaala kasta waa laga xusaa 21ka Okt. gaar ahaan magaalamadax-

da Xamar. Ciidda 21ka Okt. way ka duwan tahay ciidaha kale ee waddaniga ah, dabaaldegga maalintaas marti badan oo ka tirsan Afrika, Aasiya, Ameerika iyo Yurub ayaa yimaada oo ka qayb gala faraxadda maalintaas. Dadweynaha Soomaaliyeed meel kasta ha joogeene bannaanka ayey u soo baxaan iyagoo xiran dharka ugu qurux badan, gaar ahaan kan hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

Maalintaas Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ayaa khudbad qaaya leh u jeediya Ummadda oo uu kaga warramo horumarka la gaaray sannadkii la soo dhaafay, shaqada sannadka cusub, iyo ra'yiga ay ka qabto J.D.S. siyaasadda adduunka. 21ka Okt. waannu jecelnahay. Waayo kacannimadeena cusub ayaa curtay.

### T. Ciidaha Diiniga ah waxaa ka mid ah:

#### 1 — MAWLIDKA NABIGA:

NABI MAXAMAD naxariistii Ilaahay korkiisa ha ahaatee wuxuu ku dhashay magaalada Maka 12kii bishii Rabiic-al awal sanadka miilaadigu markuu ahaa 571kii.

12ka Rabiic-al-awal waa maalin aad ula weyn dadka Soomaaliyeed, maxaa yeelay waa maalintii uu NABIGEENII dhashaay. Sanadkii walba maalintaas dadka Soomaaliyeed miyi iyo magaalaba iyo dawladduba aad bay u xusaan oo ay ugu dabaaldegaan, waxayna xuskaa kala mid yihiin dawladaha Islaamka oo idil.

Maalinta 12ka Rabiic-al-awal magaalooyinka waa la qurxiyaa, guryahana miyi iyo magaalaba waa la qurxiyaa, oo la udgiyaa waxaana lagu akhriyaa Nabiga ammaantiisa, waana la alla baryadaa.

Maalintaas dalka Soomaaliyeed oo dhan guryaha miyi iyo magaalaba waxaa lagu kariyaa cunto badan, xoolo badanna waa lagu qalaa, cuntada waxaa la siiyaa masaakiinta, oo aad ugu faraxda maalintaas.

Sida oo kale Masaajidda waa lagu ducaystaa waxaana lagu akhriyaa Nabiga taariikhdiisii.

Dawladda Soomaaliya waxay ka dhigtay maalinta mawlidka Nabiga ciid rasmi ah, waxaana loo yeelay qiimo weyn iyo sharaf gooni ah, shaqaalaha dawladdana waa la fasaxaa.

Maalinta 12ka Rabiici-al-awal waan ka jecel nahay maalmaha kale, maxaa yeelay waa maalintii uu Nabigeenii suubbanaa dhashay naxriistii eebbe korkiisa ha ahaatee.

## 2 — CIIDDA SOONFUREED

Ilaahey wuxuu ku faral yeelay muslimiinta inay soomaan maalmaha bisha Ramadaan oo dhan, haddaba dadyawga Muslinka ahi kadib kolka ay gutaan faralka soonka ayey Ciidaan maalinta kowda bisha Soonfureed.

Maalinta kawda soonfureed waa maalin ay faraxsan yihiin dadka Muslinka oo idili, waxaana xaaraan ah in la soomo maalintaas. Dadka Muslinka oo dhani yar iyo weyn waxay bixiyaan Salaadda ka hor Sakada Fidriga. Sakadan qof kasta wuxuu ka bixiyaa naftiisa iyo inta nafaqadoodu ku waajibtay waxaana la siiyaa masaakiinta.

Subaxa CIIDDA dadyowga Muslinka oo dhani miyi iyo magaalaba waxay isugu soo baxaan Masaajidda iyo bannaannada si ay wadajirnimo ugu tukadaan Salaadda Ciidda.

Salaadda Ciidda Soonfureed sida Salaadda Ciidda Carrafa oo kale waxay suura gelisaa Muslimiinta isutag, kaas oo u leh Muslimiista faa'idooyin siyaasi iyo ijtimaaci ah oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

1 — **Is Wacdi:** Imaamku khudbadaha Salaadda Ciidda wuxuu ku Wacdiyaa Muslimiinta waxyaalo iyaga u dan ah xagga adduunka iyo xagga aakhiroba.

2. — **Wada tashi:** Muslimiintu waxay ka wada tashadaan maalintaas danahooda.

3 — **Jimatuurad:** istaagga ay Muslimiintu isugu tagaan Salaadda Ciidda wuxuu u yahay jimatuurad iyo dhoolo tusad, wuxuuna argagixiyaa cadawga Muslimiinta.

4—Iskaalmayn iyo iscafi: maalinta Ciidda waxaa u suurawda dadyowga Muslinka ah inay iskaalmeeyaan iyo inay iscafiyaan, oo uu ruuxba, ruuxii uu horey xumaan ugu sameeyey raaligeliyo.

Dawladda Soomaaliyeed sida dawladaha Muslinka oo kale waxay ka dhigatay Ciidda soonfureed Ciid rasmi ah, oo aan la shaqaynin, dalka Soomaaliyeed oo idilna miyi iyo magaalaba dadku waxay xidhaan dhar quruxsan, jidadka iyo aqalladana waa la qurxiyaa, waxaa la qalaa xoolo badan, cunto badanna waa la sameeyaa, cuntadan waxaa la siiyaa masaakiinta.

CIIDDA soonfureed waan jecel nahay, maxaa yeelay waa maalni ay Muslimiinta oo dhan meel kasta ha joogeene faraxsan yihiin.

## 3 — CIIDDA CARRAFO :

Ciidda Carafo waa Ciidda ugu weyn ee Muslimiinta, waxayna tahay tobanka bisha dulxija, kadib kolkii ay gutaan Muslimiintu Cibaadaadka Xajka.

Maalinta Ciidda ee ah tobanka bisha dulxija waa maalinta Salaadda Ciidda la tukado, maalintaas Muslimiinta oo dhan miyi iyo magaalo waxay isugu soo baxaan Masaajidda iyo bannaannadda oo ay wada tukadaan Salaadda ,hase yeeshee shirka ugu weyn ee Muslimiintu wuxuu ka dhacaa magaalada Maka-al-Mukarrama, sababtoo ah Muslimiintii Xajka gudatay oo dhan ayaa meel qura ku wada tukada Salaadda Ciidda.

Shirarkaas ay Muslimiintu isugu imanayaan Salaadda Ciid-

da darteed waxay u leeyihiin faa'iidooyin badan xagga siyaasadda iyo xagga ijitimaaciga ahba sida aan ku soo sheegnay casharka Ciidda soonfureed, waxaan ka mid ah Muslimiinta oo: iskaashada, iscaawiya, iyo iyaga oo xooggooda arka, islamarkaas cadawga Muslinka waxaa ku dhaca argagax. Maalmaha Ciidda Carafo Muslimiinta oo dhani meel kasta ha joo geene way faraxsan yihiin, waxaana xaaraan ah in la soomo maalita Ciidda Carafo iyo saddexda maalmood ee ka dambeysa.

Dawladda Soomaaliyeed sida dawladaha Islaamka oo kale waxay ka dhigatay Ciidda Carrafo Ciid rasmi ah.

Maalintaas dadka Soomaaliyeed oo dhan miyi iyo magaalaba dhar quruxsan bay xidhaan, xoolo badanna way qalaan, cunto badanna way kariyaan waxayna siiyaan masaakiinta.

**WAYDIIN :**

1 — Waa goorma xuska Calanka Soomaaliyeed?

2. — Sidee loo xusaa maalinta madaxbannaanida Soomaaliyeed?

3 — Goormuu dhashay Kacaankii Oktoobar?

4 — Maxay yihiin Ciidaha diiniga ahi? sheeg faa'iidooyinka ay u leeyihiin Muslimiinta.

5. — Ka sheekee ciidaha ka maqan casharka wixii aad ka taqaanid.


6. — Maxaa la sameeyaa ciidaha?

7. — Xajka goormaa la aadaa?

8. — Maxay iskaga mid yihiin Ciidda soonfureed iyo tan Carrafo?

## Casharka Kow iyo Tobnaad

# CADOWGA UMMADDA SOOMAALIYEED




Cadowga ummad kasta waa labo: cadowga dabeecadda iyo midka dadka ah. Midka dabeecadda waa mid ku xiran sida ummad kastaa dhulkeeda wax uga qabsato iyo sida ay nicmada dalkeeda ku jirta ugala soo baxdo sida biyaha badan ee ku habboon dhaqidda xoolaha, waxa kale ee kaymaha laga helo sid qoryaha iyo waxyaale kale.

Waxaa jira oo kale macaadinta dhulka lagala soo baxo oo ay ka mid yihiin batroolka. Dhibaatada dabeeciga ah waxaa ka mid ah gaajada, cudurka iyo jahliga.

Cadawga dadka ee ummaddeennu waxa weeye labo:

cadowga dibadda oo ah gumeystaha iyo cadowga gudaha oo ah daka Soomaaliyeed ee gumeysiga garab siiyey ee uu kireystey.

Waxaynu casharkan ku dhigaynaa gumeystayaasha ummaddeenna dhibay. Kuwaas oo ahaa: Ingiriiska, Talyaaniga, Faransiiska, Xabashida iyo Keenya. Kuwaa waxa soo raaca kuwa iyaga kaalmeeya si ay noo gumeystaan. Kuwaana waxaa ka mid ah Maraykanka.

Balse aaneegno sida ay dawladahaasi ugu soo jiideen dadkeenna iyo dalkeenna dhibaatooyin badan :-

**1 — INGIRIISKA:**

Ingiriisku isagaa abaabuley qaybintii dalkeenna loo qaybiyey shanta meelood, wuxuuna qaatay laba qaybood: qaybta Waqooyi oo uu haystay ilaa ay ka xorowday 1960kii, iyo qaybta (N. F. D.) oo uu raaciyey Keenya kadib kolkii ay gobonnimada qaadatay 1963kii.

Ingiriisku dadka Soomaaliyeed ee ku dhaqnaa labadaas qaybood aad iyo aad buu u cadaadin jirey, umana uusan ogolayn inay ka hadlaan amaba ay ka fikiraan xoraynta iyo midenyta Ummadda Soomaaliyeed, dhinaca kalena: Waxbarsho, waxdhaqasho, caafimaad, horumar iwm. midna uma uusan ogolaan jirin dadka Soomaaliyeed. Sidaas darteed Ingiriisku waa cadawga Ummaddeenna.

**2 — TALYAANIGA :**

Talyaanigu wuxuu qaatay Soomaalida Koonfureed ilaa ay ka xorowday 1960kii. Talyaaniku intii uu haystay Koonfurta Soomaaliyeed wuxuu ku xukumi jirey xukun aad u foolxun oo ku dhisan cadaadis iyo argagixis, sababta oo ah wax sharci ah oo ay dadku isku daafacaani ma jirin, sidaas awgeed qofka uu doono wuu xiri jirey, kii kalena wuu karbaashi jirey amaseba wuu dili jirey. Talyaanigu khayraadka koonfurta Soomaaliyeed oo dhan isaga iska qaadan jirey, Tusaale ahaan Beeraha meelaha dhulka ugu fiican dadka Talyaaniga ah ayaa iska lahaa, dadka Soomaaliyeedna beerihiisa

yauu kaga shaqaysan jirey si raxmad la'aan ah. Talyaanigu guud ahaan waxbarasho, waxdhaqasho, xornimo, midnimo, caafimaad, horumar iwm. midna uma uusan ogolayn dadka Soomaaliyeed sababta oo ah Talyaanigu waa gumeyste, gumeystahan awax dan ahi uguma jirto horumarka dadka waddaniyiinta ah. Sidaas darteed Talyaanigu waa cadawgeenna.

## 3 — FARANSIISKA :-

Faransiisku waa gumeystaha saddexaad ee Reer Yurub, ee qaybta weyn ka qaatay qaybinta dalka Soomaaliyeed, wuxuuna qaatay Xeebta Soomaaliyeed ee ay Jabuuti Caasimadda u tahay, ilaa haatanna wali wuu haystaa.

Muddadaas dheer ee uu Faransiisku haystey Xeebta Soomaaliyeed, xukunkiisu wuxuu ku dhisnaa cadaadis raxmad la'aan ah : dil, xarig, dhac iyo boob, sababta oo ah isaga oo doonayey inuu niyadda ka dilo gobannimadoonka Soomaaliyeed.

Cadaadiska Faransiisku wuxuu aad u gordhay intii ka dambeysey 1960kii markii ay dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, sabata oo ah gobonnimodoonka Xeebta Soomaaliyeed ayaa halgankoodii sii kordhiyey iyaga oo doonaya inay xoroobaan oo ay ku soo biiraan walaalahooda Soomaaliyeed.

Sidaas awgeed siyaasadda uu ku maamulo Faransiisku Xeebta Soomaaliyeed haatan isaga oo la kaashanaya gumeystayaasha Yurubta galbeed, Maraykanka iyo Xabashida waxay ka dhisan tahay sida soo socoto;

B — Wuxuu ku dadaalaa inuu u qaybiyo dadka Soomaaliyeed Reer Reer.

T — Wuxuu abuuray dad yar oo dibusocod ah oo isga u adeega.

J — Wuxuu ka sameeyaa doorasho been ah oo xaqdarro ku dhisan.

X — Dadka gobonimadoonka ah, gaar ahaan kuwa indheer-garatada ah, dalka ayuu ka soo saara wixii ku harana wuu xira ama wuu dila .

Faransiisku intaas uu cadaadinayo dadka Soomaaliyeed wuxuu ku beeraa Xeebta Soomaaliyeed dad kale oo uu ka keeno Xabashida iyo meelo kale, wuxuuna uga jeedaa inuu baabi'iyo jiritaanka dadka Soomaaliyeed.

Haddaba inkasta oo uu Faransiisku ku maamulo Xeebta Soomaaliyeed siyaasaddaas fooshaxun haddana kuma uuna guulaysanin, hadda kadibna ku guulaysanmaayo, maxaa yeelay dadka Soomaaliyeed oo dhani way u baraarugsan yihiin siyaasaddaas, guushuna iyaga umbay raaci doontaa.

**4 — XABASHIDA :-**

Gumeysiga Xabashidu wuu nooga sii daran yahay kan Reer Yurub, sababta oo ah Xabashidu iyada oo ah Afrikaan ayey kala qayb gashay gumaystayaasha reer Yurub, qaybinta dalka Soomaaliyeed, waxayna hadiyad uga heshay Ingiriiska Soomaalida Galbeed. Soomaalida Galbeed ee ay Xabashidu gumeysato waa qaybta ugu qiimo weyn dalka Soomaaliyeed oo dhan, sababta oo ah way ugu dad badan tahay, ugu ballaaran tahay, gu dhul fiican tahay, weyna ugu xoolo badan tahay, waxaan ka soo burqada labada wabi ee waaweyn ee kaĺa ah Shabeelle iyo Jubba iyo Ila kale oo biyo badan, wayna Roob badan tahay. Sidaas awgeed Gobollada :- Jigjiga, Dhaxgaxbuur, Harar, Diridhabo. Iimay, Gob, Qallaafo, Qabridaharre, i. w. m. waa Gobollo hodan ku ah xagga xoolaha iyo beerahaba, waxaa kale oo ay hodan ku tahay Soomaalida Gal beed xagga macaadinta inkasta oo ilaa haatan aan lala soo bixin macaadintaas.

Cadaadiska ay Xabashidu ku hayso dadka Soomaaliyeed ay gumeysato waa mid la yaab leh oo aan taariikhda aadamiga mid la mid ah lagu arag, masal ahaan kolkii ay Soomaalidu qalaaqil samayso iyaga oo doonaya xorriyaddooda xabashidu waxay u laysaa si aan raxmad lahayn iyada oo xabadda

marnaysa dad iyo duunyoba, islamaarkaasna gubeysa aqallada iyo beerahaba.

Xabashidu horeyna ugama ogolaan jirin, haatanna uma ogola dadka Soomaaliyeed ay gumeysato inay samaystaan horumar xagga : Waxbarashada, dhaqaalaha, caafimaadka ijtimaaciga iwm, waxaa kale oo ay ka hortaagan tahay inay xorriyaddooda helaan.

Dadka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu gumeysato horeyna way ugu soo halgami jireen xorriyaddooda, haatanna wali way u halgamayaan, waligoodna xabadda joojin maayaan, shakina kuma jiro inkasta oo ay dhibaatooyin badan oo dhinac walba ahi hortaagan yihiin inay gaari doonaan xorriyaddooda goor ay noqotaba. Dhaqdhaqaaqa Gobannimadoonka Soomaalida Galbeed wuxuu aad u soo ifbaxay intii ka dambeysey 1960kii, markii ay dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliya, markii la soo gaaray 1963kii ayey dadweynaha Soomaalida galbeed dhaliyeen kacaan xorriyaddoon ah, (kacaankii xodayo) waxayna awood u heleen iyaga oo naftooda huray inay dalka intiisii badnayd xoreeyeen, laakiin gumaystaha Xabashadu isaga oo taageero ka haysta gumeystaha caalamiga ah iyo xukumadii musuqmaasuqa ahayd ee Soomaaliyeed wuxuu awood u helay inuu damiyo Kacaankas.

Dhibaatada ay Xabashidu ku hayso Ummadda Soomaaliyeed ma aha mid ku kooban inta ay gumaysato keliya, ee waa mid wada gaarta Soomaalida oo dhan, sidaas awgeed xabashidu goor iyo ayaan waxay ku soo xadgudubtaa soohdinta ay la leedahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

5. **KEENYA:** Keenya waxay haysataa dhul Soomaali ah oo ay ka dhaxashay Ingiriiska, kaas oo la yiraahdo degmada Xuduuda Waqooyi (N.F.D.) magaalooyinkeedana waxaa ka mid ah: Wajeer, Laamo, Mandheera iyo Gaarisa.

N.F.D. Waa dhul aad u qurux badan, oo ay ku dhaqmaan xoolo ay ka mid yihiin. Geel, Lo' iyo ari badan. Beerahana wuu ku fiican yahay oo ciid wacan iyo biyo badan ayuu leeyahay, dugaag iyo ugaar cayn walba leh ayaa ku dhaqma.

Dadka Soomaaliyeed ee deggan qaybtaas dalkeenna ka midka ah waxay doonayaan inay xornimo helaan kaddibna ku soo biiraan walaalahooda xorta ah. Dawladda dibusocodka ah ee Keenya ka dhisan ma ogola taas, ma qabto xoog ay dalkeenna ku haysato, waxaase u suura geliyey inay dhulkeenna haysato ciidammo Ingiriis ah iyo Amxaaro oo ay leeyihiin heshiisyo gaashaandhig ah.

Keenya iyo Amxaaraduba waxay ka mid yihiin dawladaha madow ee Afrikaanka ah, isla markaasna dabadhilifka u ah gumeystaha Reer Yurub.

Cadowyada kala duwan ee aan soo sheegnay waxaa soo raaca cadow kasta oo gumeysta noqda ama dabadhilif ah oo taageero iyo talaba siiya gumeystayaasha dalkeenna kala qaybiyey sida **Maraykanka** oo kale, kaas oo ka soo horjeeda xornimada, midnimada iyo horumarka Soomaaliya. Cadowyadaas oo dhani waxay doonayaan inay Soomaaliya kala qaybsanato, dadkeedana ay gaajo, cudur, jahli iyo xornimo la'aan badaan.

**Layli :**

1. Waa maxay cadow?
2. Yaa weeye cadowga Soomaaliya?
3. Sidee loo qaybiyey dalkeenna?
4. Sidee Soomaalidu uga hortagtay cadowgeeda?
5. Qor sheeko ku saabsan dagaal dhex maray Soomaalida iyo gumeysiga.
6. Ka faallo qiimaha dhulka Soomaalida galbeed.
7. Ka qor toban sadar jihaadkii Sayid Maxamad Cabdille Xasan.